*Barnaamijka Kaalmada Kiraynta Degdegga ah ee COVID-19 2021*
*Degmada San Diego*

# Su'aalaha Inta Badan La Is Weydiiyo **(FAQ)**

1) **Waa maxay Barnaamijka Kaalmada Kiraynta Degdegga ah ee 2021 (ERAP)?**
Barnaamijka Kaalmada Kiraynta Degdegga ah wuxuu caawiyaa qoysaska u qalma ee saameyn dhaqaale ku yeeshay cudurka faafa ee COVID-19. Barnaamijku wuxuu bixiyaa caawimaad lacag ah oo loogu talagalay kiraystayaasha u baahan in laga caawiyo kirada iyo biilasha.

2) **Sideen ku soo gudbiyaa arjiga ERAP?**
Waxaad ku soo gudbin kartaa codsi khadka tooska ah. Haddii aadan haysan khadka tooska ah oo aad u baahan tahay caawimaad dhammaystirka dalab, wac (858) 694-4801 si laguugu xiro wakiil telefoon oo kaa caawin kara.

3) **Ma u baahanahay cinwaan emayl si aan u dalbado? Ka waran haddii aanan haysan cinwaan emayl?**
Cinwaan emayl sax ah ayaa loo baahan yahay si loo soo gudbiyo arjiga khadka tooska ah. Haddii aadan mid haysan, waxaad abuuri kartaa mid aad ku buuxiso arjiga. Kuwa soo socdaa waa bixiyeyaal emayl oo bilaash ah
   - Gmail
   - Yahoo
   - Microsoft Outlook

Haddii aadan haysan cinwaan emayl, waxaad la xiriiri kartaa (858)694-4801 si aad u hesho wakiil telefoon si uu kaaga caawiyo arjiga khadka tooska ah.

4) **Maxaan sameeyaa haddii ay dhibaato iga haysato soo galista ama ka dalbashada khadka tooska ah?**
**Talaabada Koowaad:** Abuur akoon

**Tallaabada Labaad:** Xaqiiji cinwaanka emailkaaga diiwaangashan kahor intaadan galin oo aadan dhammaystirin dalabkaaga. Fadlan hubi iimeellkaaga oo guji xiriirka fariinta iimaylka diiwaangelinta ee aad heshay si loo xaqiijiyo cinwaanka iimeelkaaga diiwaangashan.
   - Haddii aadan heli karin emailka diiwaangelinta ee laguu soo diray, fadlan hubi qashinkaaga ama galkaaga spam. Haddii aadan wali heli karin iimeelka diiwaangelinta, riix xiriirka "Resend Email Confirmation" ee bogga galitaanka.

**Tallaabada Saddexaad:** Soo gal oo buuxi arjigaaga khadka toos ah.
o Haddii aad si guul leh u xaqiijisay cinwaanka iimaylkaaga, laakiin aanad wali geli karin, dooro “Forgot

your password?" xiriiri bogga galitaanka. Hubi iimeelkaaga oo riix xiriirka ku jira farriinta emayl ee laguu soo diray si aad u furto bogga websaydhka sidaa darteed waxaad abuuri kartaa lambarkaaga sirta ah ee cusub si aad u gasho.

.

**5) Ma waxaan u baahanahay inaan ku bixiyo dukumiintiyada taageeraya codsigayga?**

Waa ikhtiyaar in la bixiyo caddeyn waqtiga codsiga, si kastaba ha noqotee waxaa si weyn loogu dhiirigelinayaa in dukumiintiyada la siiyo arjiga si loo hubiyo in si dhakhso leh loo shaqeeyo. Haddii arji loo xushay dib u eegis, shaqaalaha degmada waxay codsan doonaan wixii xaqiijin ah ee maqan..

**6) Sidee la ii soo ogeysiinayaa haddii la'idoortay?**

Dhammaan codsadeyaasha waxaa lagu ogeysiin doonaa in la doortay iyo inkale iimeel ama boostada (haddii aanay iimeelkooda soo gudbin). Xaaladda dalabka waxaa laga eegi karaa khadka tooska ah meel kasta oo joogtid.

**7) Kaalmo intee le'eg oo kiraysi ah ayaan u qalmi karaa?**

ERAP waxay mudnaan siin doontaa kaalmada bixinta ee kiraystayaasha ka dambeeya kirada iyo adeegyada. Kaalmada dhaqaale ee laguugu leeyahay waxay noqon kartaa Abriil 2020 illaa Maarso 2021. ilaa laba iyo toban bilood. Waxaad sidoo kale dalban kartaa kirada hadda iyo tan mustaqbalka, laakiin degmadu waxay codsiyadaasha uga baaraandegi doontaa si gooni ah, waqti mustaqbalka ah iyo haddii maalgelin la heli karo.

- **Haddii mulkiilaha guriga iga aqbalo kaqaybgalka barnaamijkan…**

Haddii mulkiiluhu oggolaado inuu kaqaybqaato barnaamijka, waxaad heli kartaa 100% bixintaa deynta kugu ururtay laga bilaabo Abriil 2020 illaa Maarso 2021. Mulkiilayaasha guryaha ee doorta inay kaqaybqaataan waxaa looga baahan yahay inay dhammaystiraan oo ay saxiixaan heshiis ay ku aqbalayaan 80% lacag bixinta oo dhammaystiran deynta kirada ah ee kiraystaha ku leeyahay, taas oo macnaheedu yahay mulkiiluhu inuu iska cafiyo deynta harsan. Kirada baaqiga ah waxaa si toos ah loo siin doonaa mulkiilaha.

- **Haddii mulkiilaha guriga iga aqbali waayo ka qaybgalka**

Mulkiiluhu qasab kuma aha inuu ka qaybqaato barnaamijka. Haddii mulkiiluhu diido ka qaybgalka barnaamijka, degmadu waxay kaliya magdhow siin kartaa 25% ee kiraysiga kirada bishii ee qoysaska xaqa u leh ee la ururiyay laga bilaabo Abriil 2020 illaa Maarso 2021. Bixinta kirada baaqatay waxaa toos loogu bixin karaa kiraystaha.

**8) Haddii aan la noolahay qof aan isla degganahay, miyaan labadeenaba dalban karnaa?**

Hal codsi keliya ayaa gurigiiba loo oggolaan doonaa

**9) Miyaan u qalmi karaa gargaarka kirada degdegga ah haddii aan helaayo nooc kale oo kabitaan kiro ah, sida Section 8, caawimaad deg deg ah, ama caawimaad kiro oo laga helo hay'adaha aan macaash doonka ahayn?**

Qoysaska hada qaata kabida kirada sida Section 8, kaalmo guriyeen deg deg ah, ama kaalmo kiro ah oo laga helo wakaaladaha aan macaash doonka ahayn way codsan karaan. Reerku waa inay caddeeyaan in kaalmada ERAP ee la codsaday aysan balaabi karin wax kaalmo ah, oo ay ku jiraan federaalka, gobolka, ama kaalmada deegaanka ee lagu bixiyo isla kharashyada. Ku-celcelinta kaalmada waxay ku xiran tahay xaqiijinta Gobolka.

**10) Waa meelahee ERAP uu oggolaadey?**

Degmadu waxay u adeegi doontaa shakhsiyaadka iyo qoysaska gobolka oo dhan marka laga reebo kuwa ku nool magaalooyinka San Diego iyo Chula Vista maadaama magaalooyinkaas ay heleen lacag ay ku hawlgalaan barnaamijkooda Kaalmada Deg-degga ah ee COVID-19.

**Aagagga loo adeegay**: meelaha aan ka midka ahayn San Diego iyo magaalooyinka Carlsbad, Coronado, Del Mar, El Cajon, Encinitas, Escondido, Imperial Beach, La Mesa, Lemon Grove, National City, Oceanside, Poway, San Marcos, Santee, Solana Beach, iyo Vista

### 11) Miyaan u baahanahay inaan helo macluumaadka mulkiilahayga markaan dalbanaayo?

Haa, waa inaad haysataa magaca mulkiilahaaga iyo lambarka telefoonkiisa ama cinwaanka iimeelka ee goobta dalabka.

### 12) Maxay yihiin qaababka la aqbali karo ee xaqiijinta ee ay tahay in lagu soo gudbiyo codsigayga?

- Codsadeyaashu waa inay soo gudbiyaan nuqul ka mid ah Aqoonsiga Sawirka leh.
- Haddii Aqoonsiga sawirku uusan ka muujinayn cinwaanka hadda, markaa codsaduhu waa inuu keenaa Nuqul ka mid ah Aqoonsiga Sawirka oo la jira biilka korontada ama heshiiska kirada oo aad ku muujinayso magacaaga iyo cinwaankaaga hadda (cinwaanka ku yaal arjiga)
- Xaqiijinta oo kuu muujinaysa deganaansho la'aanta guryaha ama qatar ugu jirta inay la soo deristo hoy la'aan, sida biilkii hore ee kirada ama ogaysiiska ka saarista.
- Xaqiijinta dakhliga sida jeegagga mushaharka ee xubnaha qooyska oo dhan ee shaqeeya, caddeynta shaqo la'aanta, warqadda caawimada CalWORKs, iwm. waa inay ka tarjumtaa taariikh aan ka horrayn Febraayo 1, 2021. Waraaqaha caddaynaya inaad SSI / SSA helo laga billaabo Janaayo 1, 2021 waa la aqbali doonaa.

### 13) Haddii la'idoorto inaan helo deeqda hal-mar, miyay waajib igu tahay inaan dib u bixiyo?

Kirayste loogama baahna inuu dib u bixiyo kabista, waa deeq.

### 14) Haddii aan ahay kirayste leh kiro ganacsi, miyaan u qalmaa?

Barnaamijku wuxuu kaliya ka caawiyaa codsadayaasha xaq u leh kaalmada kirada guryaha ee aan ahayn kirada ganacsiga.

### 15) Haddii aan ahay mulkiile leh guriga guur guura oo kiro bannaan leh, ma dalban karaa barnaamijka?

Haa, barnaamijku wuxuu ka caawin doonaa mulkiileyaasha guryaha guur guura ee uqalma kireynta booska.

### 16) Mulkiileyaashu ma ku dalban karaan magaca kiraystaha?

Mulkiilayaashu way ku codsan karaa magacaga kiraystaha, laakiin kiraystaha ayaa laga rabaa inuu isla saxeexo. Wada-saxiixida waxaa si toos ah ugu samayn karaa kiraystaha iyada oo loo marayo bogga dalabka ama isgaadhsiin qoraal ah (oo ay ku jiraan elektarooniga) oo ka socda kiraystaha oo qiraya dalabka uu bixiyay mulkiilaha gurigu.

### 17) Haddii mar hore la ii oggolaaday kaalmada kirada degdegga ah, miyaan xaq u leeyahay inaan helo gargaar dheeraad ah?

Haddii aad kaalmo ka heshay barnaamij hore, ama degmada ama magaalo kale, weli waad codsan kartaa barnaamijkan.

Codsadeyaashu waxay awoodi doonaan inay codsadaan wixii baaqi ah ee dib u dhaca ah ee ka yimid muddada la oggol yahay (Abriil 2020 illaa Maarso 2021). Deyn kasta oo hore loo guday / lagu bixiyay barnaamijyadii hore lama oggolaan doono.

### 18) Goorma ayaan filan karaa in codsigayga la socodsiinayo oo lacag bixinta la bixin doono haddii la oggolaado?

Codsiyada waxaa mudnaan la siin doonaa dib u eegidda iyadoo lagu salaynayo dhowr arrimood. Waxay ku xiran tahay meesha dalabkaagu ku jiro qaybaha mudnaanta leh, waxay qaadan kartaa 2-4 toddobaad ama ka badan, laga bilaabo marka aad codsato ee degmadu xiriir kula sameyso.

Waxaan markaa ka dib codsan karnaa xaqiijin dheeraad ah oo markii xaqiijimahaa aan helno, codsiga waa la qiimeyn doonaa.  Nidaamkani wuxuu qaadan karaa ilaa hal toddobaad.

Ka dib waxaan ka codsan doonnaa macluumaad mulkiilahaaga taasna waxay qaadan kartaa illaa toddobaad in la soo ururiyo oo loo hawlgalo.

Mar alla markii codsiga la oggolaado, waxay qaadan kartaa laba toddobaad oo kale inta lacagta lagu bixin doono. Codsadeyaashu waxay awoodaan inay ka eegaan xaaladdooda barta internetka ee ay ka codsadeen, waxayna ka helayaan dhammaan wixii xidhiidh iyo nidaamka Gobolka.

**19) Sidee codsiyada loo kala hormariyaa?**

Mudnaan siinta Dowladda Dhexe iyo tan Gobolka waxaa kamid ah:

- Dakhliga reerka ee ka hooseeya 50% Dakhliga Dhexe ee Aagga (AMI)
- Qof ama in ka badan oo reerka ka mid ah ayaa shaqo la'aan ah laga bilaabo taariikhda arjiga caawimada, mana shaqeynin 90 maalmood laga bilaabo taariikhda codsashada (dakhliga reerku waa inuusan ka badnaan 80% AMI)

Degmadu waxay ku dartay waxyaabahan kala horumarinta ah:

- Qooysaska halka waalid keliya ah
- Sinaanta Caafimaadka (iyadoo la adeegsanayo labada ugu hooseeya ee Goobaha Caafimaadka ama HPI si loo kala hormariyo) - Dadka deegaanka ah ee ku nool meelaha ay ku yar tahay fursadaha caafimaad.